

# Hagaha Dadka markii ugu horreysay helaya Washington Apple Health (Medicaid)

Qaybta 1aad: Kadib marka aad isku qortid Apple Health Istimaal hagahan si aad wax uga oogaato caymiska Apple Health iyo sida loo sameysto ballantaada ugu horreysa.

Qaybta 2: Macluumaadka ku saabsan sameynta ballantaada daryeelka caafimaadka ee ugu horreysa (**Eeg qaybta 2aad ee hagahan**).

## Qaybta 1: Kadib marka aad isku qortid Apple Health

Waxaan boostada kuugu soo diri doonaa waraaq ku qoran magaca buug-yarahaaga soo dhoweynta. Buug-yarahaaga wuxuu kula wadaagayaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan caynsanaantaada. Buugyarahan ka eeg barta internet-ka [hca.wa.gov/ah-client-booklets](https://hca.wa.gov/ah-client-booklets). Qorshahaaga caafimaadka wuxuu sidoo kale kuu soo dirayaa macluumaadka ku saabsan dheefahaaga.

Waxaad heli doontaa kaarkaaga adeegyada ProviderOne ku dhowaad laba toddobaad ka-dib markaad isku qorto Apple Health. Hayso kaarkan. Kaarkaaga waxaa la hawlgeliyaa inta aan boostada laguugu soo dirin ka hor.

Xubin kasta oo reerkaaga ka tirsan ee ku qoran Apple Health wuxuu heli doonaa kaarkiisa. Kaarkaaga wuxuu muujinayaa lambarkaaga macmiilka kaas oo cimrigaaga oo dhan aad lahaan doonto. Waxaad u baahan tahay lambarkan si aad u hesho adeegyadaada caafimaadka.

Boostada kuuguma soo diri doonno kaar cusub haddii aad horey u lahayd caymiska Apple Health. Kaarkaagii hore ayaa weli shaqeynaya oo lambarkaaga macmiilkana wuxuu sii ahaanayaa isla midkii hore.

### Haddii aadan helin kaarka

Waxaad codsan kartaa kaarka adeegyada ProviderOne haddii aadan ku helin laba toddobaad gudahooda ka-dib markaad codsato caymiska ama haddii uu kaarkaaga kaa lumo.

Waxaad heli kartaa nuqul dijitaal oo kaarkaaga adeegyada ah iyadoo la adeegsanayo app-ka telefoonka gacanta ee WAPlanfinder. App-ka ka soo-degso: [wahbexchange.org/mobile/](https://wahbexchange.org/mobile/)

Waxaa jira qaabab baddan oo loogu codsan karo kaar bedelaad ah oo lagu siiyo booskii midka kaa lumey:

- Booqo barta macmiilka ProviderOne: <https://www.waproviderone.org/client>
- Ka wac khadka bilaashka ah 1-800-562-3022
- Barta internet-ka ka codso beddelka: <https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/home/client>
  - o Dooro mowduuca "Kaarka Adeegyada"

Kani waa kaarkaaga adeegyada ProviderOne



### Isku qorida qorshahaaga caafimaadka

Haddii aad barta internet-ka ka codsato Apple Health oo loo marayo [wahealthplanfinder.org](https://wahealthplanfinder.org), waxay u badan tahay in aad ku qoran tahay qorsheyaasha caafimaadka ee degaankaaga. Haddii aadan isku qorin qorshaha caafimaadka waqtigaas, anaga ayaa mid kuu dooran doona.

### Miyaan bedeli karaa qorshahayga caafimaadka?

Waxaad waqti kasta iska beddeli kartaa qorshaha caafimaadkaaga. Isbeddellada la sameeyay caadi ahaan waxay dhaqangalaan maalinta koowaad ee bisha xigta ama soo socota, oo ku xiran goorta isbeddelka la sameeyay. Waxaa jira qaabab baddan oo lagu bedeli karo qorshahaaga:

- Onlayn: [wahealthplanfinder.org](https://wahealthplanfinder.org)
- Bogga internetka Macmiilka ProviderOne: <https://www.waproviderone.org/client>
- Barta internet-ka ka codso beddelka: <https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/>. Dooro "Macmiil" ka dibna xulo mowduuca "Enroll/Change Health Plans." "Isqorida/Bedelida Qorshooyinka Caafimaadka."
- Ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka lambarkan 1-800-562-3022.

Washington State  
Health Care Authority

Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa  
maamulaya Washington Apple Health  
(Medicaid)

Daryeelka caafimaadka la maareeyay*	Talefoon	Khadka Caawimaadda Kalkaalayaha Caafimaadka **
Community Health Plan of Washington (CHPW) <a href="http://chpw.org">chpw.org</a>	1-800-440-1561	1-866-418-2920
Coordinated Care of Washington, Inc (CC) <a href="http://coordinatedcarehealth.com">coordinatedcarehealth.com</a>	1-877-644-4613	1-877-644-4613
Molina Healthcare of Washington (MHW) <a href="http://molinahealthcare.com/members/wa">molinahealthcare.com/members/wa</a>	1-800-869-7165	1-888-275-8750
UnitedHealthcare Community Plan (UHC) <a href="http://uhccommunityplan.com/wa/medicaid/imc">uhccommunityplan.com/wa/medicaid/imc</a>	1-877-542-8997	1-877-543-3409
Wellpoint Washington (WLP) <a href="http://wellpoint.com/wa/medicaid">wellpoint.com/wa/medicaid</a>	1-833-731-2167	1-866-864-2544

\* Ma ahan in qorsheyaasha oo dhan laga heli karo dhammaan degaamada gobolka.

\*\* Wac lambarka bilaashka ah ee qorshahaaga caafimaadka si aad kalkaaliso caafimaad ula hadasho 24 saacadood maalintii, toddobo maal-mood toddobaadkii.


 **Amerigroup**  
An Anthem Company  
[www.myamerigroup.com/WA](http://www.myamerigroup.com/WA)

Effective Date:  
Date of Birth:  
Subscriber #:


**Washington Apple Health + Behavioral Health**




Member Name:  
Medicaid or CHIP ID Number:  
Primary Care Provider (PCP):  
PCP Telephone #:  
PCP Address:  
Clinic/Group:  
Vision: **1-855-225-2640**  
Member Services/Pharmacy and Behavioral Health: **1-800-600-4441**  
Crisis Hotline: **1-800-852-2923**  
Amerigroup On Call: **1-866-864-2544**


 **COMMUNITY HEALTH PLAN**  
of Washington™


**Name** JOHN M SAMPLE  
**Member #** 12345678 01  
**Plan** Washington Apple Health  
**Group** Apple Health - Family  
**Clinic (PCP)** Clinic XYZ  
**Clinic Phone** 555-555-5555  
**Copayment** OV \$0 / ER \$0 / RX \$0  
**RxBin** 003858  
**RxGroup** CHWA  
**State ID#** 200000000WA



 **EXPRESS SCRIPTS™**

Please see back of card for important information.

 **coordinated care.**





RXBIN: 004336  
RXPCN: MCAIDADV  
RXGRP: RX5435

**NAME:**  
**MEDICAID ID#:**  
**MEMBER ID#:**  
**DOB:**

If you have an emergency, call 911 or go to the nearest emergency room (ER).  
Emergency services by a provider not in the plan's network will be covered without prior authorization. CoordinatedCareHealth.com

©Coordinated Care of Washington, Inc.

 **MOLINA**  
HEALTHCARE




**Member:** John Doe  
**Identification #:** 12345678910  
**Date of Birth:** 01/01/1970  
**Client ID:** 987654321WA


**Program:** IMC-AHA (Apple Health Adult)  
**PCP Name:** Mary Anderson, M.D.  
**PCP Phone:** (222) 333-4444  
**PCP Location:** 123 Anytown, WA 98765  
**PCP Eff:** 01/01/2022  
**Auth:** (800) 869-7185

**RxBIN:** 000000  
**RxPCN:** 000000  
**RxGRP:** 000000

Member Services: (800) 869-7165  
Teladoc: (800) 835-2362 or  
Teladoc.com/MolinaWA  
MyDoc Group

[MyMolina.com](http://MyMolina.com)

 **UnitedHealthcare** | Community Plan  
Health Plan (80840) 911-87726-04




**Member ID:** 000000000 **Group Number:** WAHLOP

**Member:**  
**MEMBER NAME** **Payer ID:** 87726

**PCP Name:**  
**PROVIDER NAME**  
**PCP Phone:** (000)000-0000

**PROVIDER ADDRESS**  
CITY, STATE, ZIP

 **OPTUMRx™**  
**Rx Bin:** 610494  
**Rx GRP:** ACUWA  
**Rx PCN:** 9999

0501 **Apple Health - Family Coverage**  
Administered by UnitedHealthcare of Washington, Inc.

## Kaarkaaga qorshaha caafimaadka

Qorshahaaga caafimaadka wuxuu ku soo diri doonaa kaar aqoonsi oo ah sida mid ka mid ah kuwa boggan lagu muujiyey. Hayso kaarkan. Horey u sii qaado kaarkaaga qorshaha caafimaadka iyo kaarka adeegyada ProvideOne marka aad tageyso dhakhtarka, farmashiyaha, ama bixiyaha kale ee daryeelka caafimaadka. Sidoo kale waxaad u baahnaan kartaa sawir Aqoonsi.

## Muxuu yahay farqiga u dhaxeeya Washington Apple Health iyo Caawimaada caafimaadka?

Washington Apple Health waa magac loogu talagalay Caawimaada caafimaadka kajirta gudaha Gobolka Washington. Daryeel bixiyahaaga ama shaqaalaha soo dhoweynta waxaa dhici karta in uu ugu yeero Caawimaada caafimaadka.

## Muxuu yahay daryeelka la maareeyay?

Macaamiisha Apple Health intooda badani waxay leeyihiin "daryeel la maareeyo" taas oo macnaheedu yahay in Apple Health ay siiso qorshaha caafimaadka bil kasta lacagta caymiska.

## Waa maxay Apple Health oo aan lahayn qorshe daryeel oo la maareeyo?

Caymiska Apple Health ee aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo (oo sidoo kale loo yaqaanno lacagta-adeegga) waa marka Apple Health ay lacagta si toos ah u siiso adeeg bixiyahaaga. Inta badan macaamiisha Apple Health waxay ku qoran yihiin daryeelka la maareeyo.

Apple Health waxay si toos ah u siinaysaa adeeg bixiyahaaga lacagta dheefaha qaarkood, xitaa haddii aad ku qoran tahay daryeelka la maareeyo. Tani waxaa loo yaqaanaa lacagta-adeegga.

Macaamiisha ku qoran Apple Health ee aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo waxay adeeg bixiye ka helaan barta internetka <https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider> ama wac 1-800-562-3022.

## Adeegyo ma heli karaa inta aanan helin kaarkeyga adeegyada ProviderOne?

Waxaad arki kartaa dhakhtarka ama waxaad soo buuxsan kartaa daawooyinkaaga ka horta inta uusan kaararkaaga imaan:

- Booqo barta macmiilka ProviderOne oo ah <https://www.waproviderone.org/client> si aad u hesho lambarkaaga Aqoonsiga ProviderOne. Sii lambarkaas caafimaad bixiyaha ama farmashiilaha.
- Usheeg adeeg-bixiyaha ama farmashiistaha magacaaga, taariikhdaada dhalashada, iyo lambarka Damaannada Bulshada. Waxay kaa raadin karaan sistem-yadooda.

## Maxaan sameynayaa haddii Aan lumiyo kaarkayga qorshaha caafimaadka?

- Wac qorshahaaga caafimaadka kana codso kaar cusub.

## Sideen ku hubin karaa isqoritaankeyga Apple Health?

Hubi isqoritaankaaga Apple Health:

- Si toos ah internetka: <https://www.waproviderone.org/client>
- Telefoonka: 1-800-562-3022

## Miyaan ku khasbanahay in aan isku qoro qorshaha caafimaadka?

Haa, ayada oo ay jiraan xoogaa kareebid ah. Wixii kusaabsan macluumaad faah-faahsan kafiiri buugg yaraha Kusoo dhowoow Washington Apple Health boggaan internetka [hca.wa.gov/ah-client-booklets](https://hca.wa.gov/ah-client-booklets). Haddii aadan hubin buuggyaraha la akhriyayo midka uu yahay, ka wac Xarunta Adeega Macamiilka ee Apple Health lambarkan 1-800-562-3022 si aad caawimaad u heshid.

## Ma arki karaa wax adeeg bixiye ah?

Maya, waa in aad aragtaa adeeg-bixiyeyaasha ku jira shabakada qorshahaaga caafimaadka, haddii qorshahaaga uu ku siinayo fasax qoraal ah oo aad ku arkayso takhasusle mooyaane. Haddii aad dooneyso in aad aragto adeeg-bixiye gaar ah, weyddii qorshayaasha caafimaadka ee ay shabakadooda ku jiraan.

## Miyuu u baahanyahay qofkasta oo kamid ah qoyskayga in uu haysto isla qorshahaan caafimaadka?

Haa, qof walboo ka tirsan reerkaaga wuxuu leeyahay qorshe caafimaad oo isku mid ah, haddii ay yihiin Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah mooyaane.

## Muxuu yahay farqiga u dhaxeeya qorshooyinka?

Qorsheyaasha oo dhan waxay caymiyaan adeegyo aasaasi oo isku mid ah, laakiinse waxay ku kala duwan yihiin sida ay adeegyadu u bixiyaan iyo shabakooyinka adeeg-bixiyahooda.

- Wax badan ka baro adeegyada aasaasiga ah ee la caymiyey: [hca.wa.gov/apple-health-services](https://hca.wa.gov/apple-health-services).

## Sideen dib-u-cusboonaysiis ugu sameeyaa caymiskeeyga?

Caymiskaaga Apple Health caadi ahaan wuxuu socdaa hal sano. Waxaan kuu soo diri doonnaa warqad aan kugu xusuusinayo in aad dib-u-cusboonaysiiso caymiskaaga, sidaa daraadeed waa muhiim in aad cusboonaysiiso cinwaankaaga boostada. Ogow wax badan oo ku saabsan in aad ku cusboonaysiiso caymiskaaga barta internetka [hca.wa.gov/apply-or-renew-coverage](https://hca.wa.gov/apply-or-renew-coverage).

## Maxaan sameeyaa haddii aan leeyahay caymiska daryeelka caafimaadka oo gaar loo leeyahay?

Haddii aad haysato caymis caafimaad ama ilko kale oo aad ka helayso loo-shaqeeye, lammaane guri/xaas, ama waalid, Apple Health waxay bixin kartaa lacagaha laga jarayo, lacagaha caymiska ee la wadaago, iyo kharash kastoo jeebka laga bixiyo ee loogu talagalay adeegyada caymisan ee la aqoonsan yahay. U soo sheeg caymiskaaga daryeelka caafimaadka kale mid ka mid ah siyaabahan soo socda:

- Ku soo sheeg caymiska ama isbeddelka bartan <https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/>.
- Wac lambarka Adeega Macamiilka Apple Health 1-800-562-3022.

Haddii aad ku qoran tahay qorshaha daryeelka la maareeyay, sidoo kale u soo sheeg caymiskaaga kale qorshahaaga.

## Farmashiyahee ama dukaan kee daawo lagu gado ee aan isticmaali karaa?

Isticmaal farmashiyaasha ama dukaamada daawada ee ku jira shabakada qorshahaaga caafimaadka.

## Maxaan sameynaa haddii aan qabbo xaalad degdeg ah?

Wac 911 ama booqo qolka xaaladaha degdegga ah ee ugu dhow haddii aad leedahay dhibaatooyin caafimaad oo degdeg ah ama daran ee aad u maleynayso xaalad degdeg ah. Sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suuragalka ah u wac qorshahaaga caafimaadka si aad u oggaysiiso in aad leedahay xaalad degdeg ah iyo halka aad daryeelka ka heshay.

Haddii aad u baahantahay daryeel degdeg ah, laakiin nolohaada aanan ahayn mid markaasi khatar kusugan, wac daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah, qorshahaaga caafimaadka, ama khadka kalkaalisada shaqaysa24-saac. Kafiiri bogga 2 wixii kusaabsan lambarada teleefoonka.

## Miyaan ku khasbanahay in aan la kulmo ama arko daryeel bixiyaha ama aan buuxiyo qoraalo daawo?

Maya, looma baahna in aad bixiso adeegga la caymiyay. Waxaa dhici karta in aad lacag bixisid haddii:

- Waxaad helaysaa adeeg aanan la caymin ama caafimaad ahaan lagama maarmaan ah, sida irbad ku daaweynta ama qalliinka isqurxinta.
- Adeeg-bixiyahaaga ma siinayso macluumaadka caymiskaaga caafimaadka.
- Aad kaheshay daryeel adeeg bixiye aan kujirin shabakada qorshahaaga caafimaadka, aan ka ahayn haddii ay xaaladu tahay mid degdeg ah ama uu yahay qof hore-looga oggolaaday dhinaca qorshahaaga caafimaadka.
- Aadan raacin xeerarka qorshahaaga caafimaadka ee kusaabsan ka helida daryeelka aad kaheshid takhasusle.

Kafiiri Helida ProviderOne qalabka raadiska Daryeel bixiyaha boggaan internetka <https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider> si aad u heshid daryeel bixiye adeeg-lacag-la'aan ah.

Si aad u hesho liiska dheefaha ee uu si toos ah u bixiyo Apple Health, eeg buugyarahaaga Ku Soo-dhawoow Washington Apple Health oo laga heli karo bartan [hca.wa.gov/ah-client-booklets](https://hca.wa.gov/ah-client-booklets).

## Sideen ku helaa daryeelka ilkaha?

Waxaad daryeelka ilkaha aad ka helaysa adeeg-bixiye aqbala Apple Health. Isticmaal qalabka baarista ee Hel Adeeg-bixiye (Find a Provider). Isticmaal kaarkaaga adeegyada ProviderOne marka aad helayso adeegyada caafimaadka.

Si aad u hesho bixiyaha adeegga ilkaha:

- DentistLink
  - o Barta Internet-ka: [DentistLink.org](https://DentistLink.org)
  - o Wac 1-844-888-5465
- Hel qalabka baarista Adeeg-bixiyaha:
  - o Online-ka: <https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider>

Ka fiiri guudmarka adeegyada ilkaha ee uu caymiyay Apple Health [hca.wa.gov/dental-services](https://hca.wa.gov/dental-services).

## Sideen ku helaa baaritaannada indhaha iyo ookilyaale?

Adeegyada cabbirka iyo baaritaannada indhaha, oo ay ku jiraan baaritaannada loogu talagalay fallaaraha ilayska iyo goobaha muuqaalka, ayaa waxaa loo fidin karaa carruurta iyo dadka waaweyn iyadoo loo marayo qorshahaaga caafimaadka.

- Carruurta ay da'doodu tahay 20 sano jir ama ka yar — qalfoofka ookiyaalaha, muraayadaha indhaha, xuub-arageedyada waxaa caymiya lacagta-adeegga ee Apple Health. Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah wuxuu kugu caawin karaa in dheefahan hesho oo aad isku dubarido daryeelkaaga marka loo baahdo.
- Dadka qaangaarka ah — qalfoofka ookiyaalaha, muraayadaha, iyo xuub-arageedka ma caymin Apple Health. Waxaad qiimo-dhimis ku iibsana karta qalfoofyada iyo muraayadaha adiga oo kala xiriiraya adeeg-bixiye ka-qaybgalaya [hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical\\_providers\\_adult\\_medicaid.pdf](https://hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf).

## Maxaa kale oo aan u baahanahay in aan oggaado?

Macluumaad dheeraad ah ayaa ku jira Buugyarahaaga Ku Soo Dhawoow Washington Apple Health oo laga heli karo barta internet-ka [hca.wa.gov/ah-client-booklets](https://hca.wa.gov/ah-client-booklets) iyo agabka aad ka helayso qorshahaaga caafimaadka.

<b>Boggag Muhiim ah</b>	
<b>Bogg internet</b>	<b>URL</b>
Apple Health	<a href="https://hca.wa.gov/apple-health">hca.wa.gov/apple-health</a>
Bogga internetka Macmiilka ProviderOne	<a href="https://www.waproviderone.org/client">https://www.waproviderone.org/client</a>
Washington Healthplanfinder	<a href="https://wahealthplanfinder.org">wahealthplanfinder.org</a>
Washington Connection	<a href="https://washingtonconnection.org">washingtonconnection.org</a>
Buugyarayaasha Ku soo dhowoow Washington Apple Health	<a href="https://hca.wa.gov/ah-client-booklets">hca.wa.gov/ah-client-booklets</a>

---